**WARBIXIN KU SOCOTA BUKAANKA OO KU SAABSAN KA QAYBGAL DARAASADEED:**

**Histerektomiyo la xiriirta dhalmada**

**"DARAASADDA MUSTAQBALEED CAALAMIGA AH OO KU SAABSAN HISTEREKTOMIYADA LA XIRIIRTA DHALMADA"**

Waxaan dooneynaa inaan ku weydiinno in adiga iyo ilmahaaga dhashay aad ka qaybgashaan mashruuc cilmibaariseed. Dokumentigaan waxaad ka heleysaa warbixin ku saabsan mashruuca, waxa uu ka qaybgalkiisu ka dhigan yahay iyo sida aad u dooran karto inaadan ka qaybgalin (waxa loo yaqaan opt-out). Haddaad af-buuxa ku dalban weydo in warbixinta adiga iyo ilmahaaga idin ku saabsan laga saaro mashruuca, waxaa la idin ku dari doonaa daraasadda. Dhammaan waalidku wuxuu xaq u leeyahay inuu opt-out u dalbado qaybta khusaysa ilmaha, balse waalidka ummulay uun ayaa taas u dalbi kara qaybta khusaysa uurka. Waxaan dooneynaa inaad nagu soo warceliso 4 toddobaad gudahooda marka warqaddaan la diro ka dib, haddaadan nala soo xiriirin muddadaan gudaheed adiga/ilmaahaga dhashay waxaa lagu dari doonaa daraasadda.

## Waa maxay mashruucani, maxaadse u dooneysaan inaan ka qaybgalo?

Mashruucani waa mashruuc caalami ah oo u hoggaansama INOSS (the International Network of Obstetric Survey Systems). INOSS waa iskaashi caalami ah oo loogu talogalay cilmibaaris lagu baarayo dhibaatooyinka aan caadiga ahayn ee uurka iyo dhalmada, taas oo aan lagu fulin karin daraasado kalsooni leh oo heer qaran ah. Daraasaddaan waxaa ku jira dalal dhawr ah oo ay ka mid yihiin Fiinland, Noorway, Netherland, Talyaani iyo Biritish. Ujeeddada mashruucaan waxay tahay in la baaro oo la isku barbardhigo jiritaanka histerektomiyada (saaridda ilmogaleenka) la socota ama ka dambeysa dhalmada ee dalalka ku jira mashruuca. Inay qof dumar ah histerektomiyo u baahato waa dhibaato aan caadi ahayn oo la xiriirta dhalmada, waana xalka ugu dambeeya ee lagu maareeyo dhiigbax nafta halis ku ah. Iswiidhan waxaan qiyaastii ku haynaa 60 (10 000 kiiba 3) dhacdo histerektomiyo oo uur la xiriira sannadkiiba. In la baaro dhacdooyinka histerektomiyada waa cabbir wanaagsan oo lagu ogaado tayada daryeelka.

Si loo horumariyo oo loo wanaajiyo tayada daryeelka dumarka u baahan in la mariyo histerektomiyada la xiriirta dhalmada wuxuu daryeelbixiyehaagu u dirayaa cilmibaareyaasha mas'uulka ah macluumaad aan aqoonsi lahayn oo micno u leh daraasadda ee uu ka soo xigtay qoraallada caafimaadka adiga iyo ilmahaaga. Daryeelbixiyehaagu wuxuu iyana lambarkaaga aqoonsiga u diri doonaa Hay'adda Dhexe ee Tirakoobka (SCB), taasoo isku geyn doonta xogaha diiwaannada tayada (Diiwaanka uurka, Diiwaanka Iswiidhan ee xogaha la xiriira qalliinnada, Diiwaanka Iswiidhan ee daryeelka xooggan) iyo xogta SCB. Waxaa dabadeed macluumaadka aan lambar aqoonsi lahayn loo diri doonaa cilmibaareyaasha mas'uulka ah. Furaha isku xira lambarka aqoonsiga iyo lambarka taxanaha wuxuu uun la yaal SCB oo ma aha mid ay cilmibaareyaashu haleeli karaan. Furaha 3 sano ka dib ayaa la masaxi doonaa.

Daryeelbixiyehaagu wuxuu mas’uul ka yahay xogta gaarka ah ee macluumaadka loo gudbiyo diiwaannadaas tayo iyo caafimaad. Dhammaan xogta aan uruurinno waa mid aan lambar aqoonsi lahayn si aan loo helin loona raadraacin xogta shakhsiyaadka daraasadda ka qaybgalay.

Wakaaladda cilmibaarista waa gobolka Västra Götaland. Cilmibaaraha maareeya mashruuca ee mas'uuka Iswiidhan uga ah waa Takhtar sare Teresia Svanvik, gobolka Västra Götaland (eeg macluumaadka xiriirka ee hoos ku qoran).

## Maxay tahay sababta aad warbixintaan u heshay?

**Waxaad martay histerektomiyo la xiriirta uurkaaga AMA waxaa laguu doortay inaad ka mid noqoto koox hubineed oo aan histerektomiyo marin.**

Haddaad ka qaybgasho "DARAASADDA MUSTAQBALEED CAALAMIGA AH OO KU SAABSAN HISTEREKTOMIYADA LA XIRIIRTA DHALMADA" waxaad gacan ka geysanaysaa wanaajinta daryeelka caafimaadka dumarka uurka leh oo maraya ama halis ugu jira inay histerektomiyo maraan. Ka qaybgalka daraasaddu waa ikhtiyaari oo sinaba uma saamaynayso daryeelka aad heleyso. Macluumaadka waxaa loo isticmaalayaa in la isku barbardhigo daryeelka caafimaad ee histerektomiyada la xiriirta dhalmada ka jira Iswiidhan iyo dalalka kale ee ka qaybgalaya. Natiijada waxaa loo isticmaali doonaa in lagu wanaajiyo daryeelka caafimaadka, dad badan hadday ka qaybgalaanna natiijadu waxay noqoneysaa mid aad loo hubo.

## Qaabkee ayay daraasaddu u dhici doontaa?

Warbixin ku saabsan uurkaaga, dhalmadaada iyo ilmahaaga dhashay waxa lagu uruurin doonaa foom warbixineed dhacdo gaar ah oo uu buuxinayo maareeyaha daraasadda. Foomkaan warbixineed ee dhacdada waa isku mid dhammaan dalalka ka qaybgalaya. Macluumaad dhammaystir ah ayaa laga soo qaadayaa SCB iyo diiwaannada qarameed ee tayada (Diiwaanka uurka, Diiwaanka Iswiidhan ee xogaha la xiriira qalliinnada, Diiwaanka Iswiidhan ee daryeelka xooggan). Dabadeed waxaa la isku duwi doonaa xogta dumarka histerektomiyada la xiriirta dhalmada ka maray Iswiidhan iyo dalalka kale ee ka qaybgalaya daraasadda. Xogta waxaa loo barbardhigi doonaa xaammilada aan histerektomiyada marin. Tani waxay ka dhigan tahay in xog heer kooxeed ah oo aan aqoonsi lahayn uun loo barbardhigi doono xogta dalalka kale.

## Maxaa xogtayda ku dhacaya?

Mashruucu wuxuu soo uruurin doonaa oo diiwaangelin doonaa warbixin ku saabsan adiga, uurkaaga, fooshaada iyo ilmahaaga dhashay. Xogtaada gaarka ah waxaa intaan loo dirin maareeyaha mashruuca Iswiidhan ka hor loo baddelayaa lambar. Lamabarka waxa loo kaydin doonaa si ka gooni ah xogtaada gaarka ah. Daryeelahaaga caafimaadka iyo SCB oo keliya ayaa hayn doona furaha lambarkaas oo lalama wadaagayo maareeyaha mashruuca Iswiidhan ama caalam ahaan. Xogta oo qaab kooban leh ayaa lala wadaagi doonaa cilmibaaraha mas'uulka caalamiga ah, si fursad loogu helo isbarbardhigga farqiyada dalalka daraasadda ka qaybgalaya. Taas micneheedu waxay tahay in xogta loo wadaagayo heer kooxeed iyo inaysan suurtogalaynin in shakhsiyaad gaar ah laga aqoonsado xogta la wadaagayo.

## Amni

Dhammaan xogtaada iyo tan ilmahaaga dhashay waxaa lagu maammulayaa hab waafaqsan sharciga jira, waxaana loo maaraynayaa si cid aan idan u lahayn aysan u helin. Xogta lambarka ku xiran waxaa lagu soo koobayaa oo lagu kaydinayaa kombiyuutarro erey-sireed lagu ilaaliyo oo la geliyo kabadh xiran ee yaalla Isbitaalka jaamacadeed ee Sahlgrenska, kaasoo ay haleeli karaan uun cilmibaarayaal daraasadda lug ku leh. Hawlwadeennada tirokoobka ayaa heli kara xogta lambarka ku xiran si ay ugu suurogasho inay falanqayn tirakoob xogtaas uga sameeyaan. Cilmibaareyaashu fursad uma yeelan doonaan furaha lambarka.  Furaha lamabarka 3 sano ka dib ayaa la masaxi doonaa. Dhammaan xogta waxaa lagu soo bandhigi doonaa heer kooxeed, lamana soo bandhigayo wax xog ah oo khuseysa tiro 5 shakhsi ka yar.

## Aasaas sharciyeed

Dhammaan dadka maareeya xogta gaarka ah waa inay taas sharciga u cuskadaan oo ay raacaan mabaadi'da aasaasiga ah ee waafaqsan xeerka ilaalinta xogta (GDPR). Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan xeerka ilaalinta xogta (GDPR) waxaad ka heleysaa bogga internetka ee Hay'adda ilaalinta xogta gaarka ah (https://www.imy.se/verksamhet/dataskydd/det-har-galler-enligt-gdpr/).

Waa inuu sharciga Iswiidhan iyana ku qoran yahay nidaamka loo maareeyo xogta gaarka ah ee ku taal diiwaanka tayada. Qodobbada noocaas ah waxay ku yaaliin cutubka 7-aad ee sharciga xogta bukaanka (2008:355).

## Sirhayn

Sirtaada waxaa lagu ilaalinayaa mabaadi'da xafididda sirta caafimaadka iyo daryeelka ee sharciga bannaynta iyo ilaalinta sirta (2009:400).  Taas waxay caadiyan ka dhigan tahay in xogtaada gaarka ah uun laga bixin karo Diiwaanka uurka, Diiwaanka Iswiidhan ee xogaha la xiriira qalliinnada, Diiwaanka Iswiidhan ee daryeelka xooggan, hadday caddahay in adiga ama qof xigtadaada ah toona aysan dhibaato u keenayn haddii xogta la bixiyo.

## Ciribdambeedyada  iyo khataraha ka imaan kara ka qaybgalka daraasadda

Mashruucu haba yaraatee dadka daraasadda ka qabgalaya uma laha wax khatar ah oo ma laha waxyeello, xanuun ama dhibsasho. Mashruucu wuxuu ku salaysan yahay xogta qoraallada caafimaadka iyo xogta diiwaannada jira ee tayada daryeelka caafimaadka.

Waynu la soconaa in maacluumaadka qaarkood ee qoraallada caafimaadka iyo xogta diiwaannada ay noqon karaan kuwo xasaasi ah. Sidaas darteed habo yaraatee dadka ku jira daraasadda lama aqoonsan kari doono waayo dhammaan xogta gaarka ahi waxay noqonaysaa mid lambar ku xiran, natiijooyinkana waxaa keliya oo lagu soo bandhigi doonaa hab heer kooxeed ah oo ugu yaraan 5 shakhsi markiiba khuseysa.

## Xuquuqadaada

- Waxaad xaq u leedahay in laga kaaftoomo in xogtaada shakhsiyeed laga diiwaangeliyo daraasadda. Waxaan markaas kaa codsanaynaa inaad la xiriirto qof ka mid ah dadka xiriirka qaabbilsan ee hoos ku xusan.
- Haddaad doorato inaadan ka qaybgalin ama aad joojiso ka qaybgalkaaga uma baahnid inaad  sheegto sababta, taasuna mustaqbalka ma saamayn doonto daryeelka caafimaadkaaga ama daaweyntaada.
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho warbixin ku saabsan waaxda daryeel iyo wakhtiga uu qof fursad u helay xogtaada.
- Waxaad xaq u leedahay magdhaw haddii xogtaada gaarka ah loo maareeyo hab ka soo hor jeeda xeerka ilaalinta xogta (GDPR) ama sharciga xogta bukaanka.
- Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso maammulka kormeerka. Xeerka ilaalinta xogta (GDPR) ee Midowga Yurub wuxuu qorayaa inaad xaq u leedahay inaad bilaash ku hesho macluumaadka adiga kugu saabsan oo lagu maareynayo daraasadda, hadday macluumaadka wax ka khaldan yihiinna  in lagaa saxo. Waxaad iyana dalban kartaa in la masaxo macluumaadka adiga kugu saabsan.

## Macluumaad xiriir

Haddaad dooneyso inaad hesho warbixin dheeraad ah ama inaad fursad u hesho xogtaada, inaad dalbato in xogtaada la saxo ama la xaddido ama inaad dalbato in dhammaan xogtaada ama xogta ilmahaaga dhashay laga saaro kaydka xogta mashruuca "DARAASADDA MUSTAQBALEED CAALAMIGA AH OO KU SAABSAN HISTEREKTOMIYADA LA XIRIIRTA DHALMADA", fadlan hab waafaqasan macluumaadka hoos ku xusan ula xiriir maareeyaha mashruuca Dr. Teresia Svanvik ugu dambayn 4 toddobaad ka dib marka aad heshay warbixintaan. Haddii, xilligii laguu qabtay gudihiis, aad af-buuxa ugu dalban weydo in xogtaada iyo xogta ilmaahaaga dhashay laga saaro mashruuca, waxaa la idin ku darayaa daraasadda.

Wakiilka ilaalinta xogta ee isbitaalka jaamacadeed Sahlgrenska wuxuu kaala garabgali karaa inaad ogaato xogta adiga kugu saabsan ee lagu maareynayo daraasadda, waxaana lagala xiriiri karaa cinwaanka Sahlgrenska universitetssjukhus, dataskyddsombudet, 413 45 Göteborg ama telefoon lambarka  031-343 2715.

Haddaadan ku qanacsanayn sida xogtaada loo maaraynayo waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso Hay'adda ilaalinta xogta gaarka ah oo ah maammul kormeer. Warbixin waxay ku taal bogga internetka Hay'adda ilaalinta xogta gaarka ah (https://www.imy.se/privatperson/dataskydd/vi-guidar-dig/dina-rattigheter-i-varden/).

Waxaad iyana faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan diiwaannada tayada ka akhrisan kartaa www.kvalitetsregister.se.

Maareeyaha mashruuca
*Iswiidhan*

Teresia Svanvik
Takhtar sare, Dr Caafimaad
Qaybta dhalmada iyo caafimaadka dumarka, Jaamacadda Göteborg
Takhasuska gaarka ah: Dhalmo, Isbitaalka jaamacadeed ee Sahlgrenska
Tfn: 0730-538215
E-mail: teresia.svanvik@vgregion.se